Dowladda Ontaariyo: Xirmooyinka Baarista antigen-ka degdega ah

Dadaalka lagu dhiirrigelinayo ku soo laabashada badbaadada leh ee fasalka ka dib fasaxa jiilaalka/qaboobaha, annaga oo ka wakiil ah Dowladda Ontario, Guddoonka Waxbarashada ee Dugsiyada Degmada Ottawa-Carleton waxay ku faraxsan yihiin inay awoodaan inay guriga u qaataan qalabyada baaritaanka antigen-ka degdegga ah ilmo kasta oo taga dugsi ay dawladdu maalgeliso ee Ontario ku yaal.

Xirmooyinka baarista antigen-ka ee degdega ah waxaa loogu talagalay inuu isticmaalo ilmo kasta oo taga dugsi ay dawladdu maalgeliso, iyada oo aan loo eegin xaaladda tallaalkooda. Xirmooyinka baaritaanka antigen-ka degdega ah waa in loo qaybiyaa ardayda ka qaybqaata waxbarashada qof ahaaneed ee dugsiga toos loo tegeyo. Doorashadan baarista ah **ma** heli doonaan ardayda internetka wax ku baranaysay tan iyo Sebtembar 2021.

Fadlan ogow, ka qaybqaadashada ilmahaaga ee baaritaanka antigen-ka ee degdega ah waa **ikhtiyaari**. Ardayda loogama baahna inay ka qaybqaataan si ay ugusoo noqdaan fasalka ka dib fasaxa jiilaalka/qaboobaha.

Iyadoo la siinayo ardayda xirmooyinka baarista antigen-ka degdega ah waa qalab muhiim u ah maaraynta faafitaanka COVID-19, tallaalku wuxuu ahaanayaa ilaalinta ugu waxtarka badan ee ka hortagga fayraska iyo noocyadiisa. Xaqiijinta in carruurta iyo dhallinyarada la tallaalo waxay siinaysaa ilaalin heerkoodu xooggan yahay iyo caawinta inay dugsiyadu u furnaadaan sida ugu macquulsan ee badbaado ah.

Waxa kale oo muhiim ah in la xasuusto in dhammaanteen aan u baahanahay inaan sii wadno xeeladaha muhiimka ah ee caafimaadka bulshada kuwaas oo waxtar u leh xakamaynta masiibada, oo ay kamid yihiin joogitaanka guriga markaad jiran tahay, is-baarida haddii aad leedahay calaamado cudurka, gacmahaaga si joogto ah u dhaqdid iyo xirashada weji xirka marka loo baahdo.

Fadlan akhri macluumaadka muhiimka ah ee hoos ku qoran ka hor inta aadan isticmaalin qalabka baarista antigen-ka ee degdega ah.

Goorta la Isticmaalayo Qalabka Baaritaanka Antigen-ka ee Degdegga ah (ee la qaybiyay ka hor fasaxa jiilaalka/qaboobaha):

- Ardayda doorata inay isticmaalaan qalabka baarista antigen-ka ee degdega ah, waxa lagula talinayaa ardaydu inay sameeyaan baarista antigen-ka degdega ah 3-4tii maalmoodba mar fasaxa ciidaha lagu jiro, Isniin kasta iyo Khamiis kasta oo bilaabmaya Diisambar 23, ilaa dhammaan shantii baaris la isticmaalay.
- Xirmooyinka baarista antigen-ka degdega ah waxa kaliya oo la isticmaalayaa marka ilmuhu aanu **calaamadaha jirada lahayn** (tusaale, aanu lahayn wax calaamado ah ee COVID-19 oo aanu la kulmin qof la xaqiijiyey inuu qabo COVID-19).
- Qofkasta oo leh calaamado ama loo aqoonsaday inuu xiriir dhow la yeeshay kiis

cudurka waa inuu wali helaa baaritaanka PCR. Baaritaannada baarista antigen-ka degdega ah waa inaan loo isticmaalin beddelka baarista PCR ee dadka calaamadaha leh ama dadka xiriirka dhow la leh kiisaas cudurkan.

Isticmaalka Qalabka Baarista Antigen-ka ee Degdegga ah ee Guriga Loo Qaato:

- BTNX Jawaabta Degdegga ah waxaa lagu samayn karaa iyadoo la isticmaalayo suuf lasoo mariyo sanka gudihiisa dambe (ee baakada ku jirta, sida ay ansixisay Hay'adda Caafimaadka Canada) ama iyadoo la isticmaalayo dhuuqid gudaha shishe ee sanka (sida ay ku talisay Hay'adda Caafimaadka Dadwaynaha Ontario ee dukumeentigan, iyadoo la siinayo dareen sare marka la barbar dhigo daloolka sanka hore ee suufka) . Labada nooc ee muunada ururinta waxaa lagu samayn karaa iyadoo la isticmaalayo suufka NP ee lagugu siiyay qalabka.
- Fadlan raac tilmaamaha lagugu siiyay warqadan.
- **Qoraal muhiim ah:** Waalidiinta ama dadka ardayda masuulka ka ah waxay dooran karaan inay maamulaan baaristan carruurta u baahan taagyeerada (tusaale, carruurta yaryar).

Waxa la sameeyo baaritaankaaga ka dib:

- Waxaad ku ogaan doontaa natiijada baaritaanka 15 daqiiqo gudahood. Haddii natiijada baaritaanka ilaa hadda la sameeyay ayna sheegin inuu cudur jiro, ilmahaagu wuxuu u aadi karaa dugsiga sidii caadiga ahayd. Xitaa haddii ilmahaagu laga helo in ayna cudurka qabin, waa inay sii wadaan u hoggaansanaanta dhammaan tilmaamaha caafimaadka dadweynaha ee khuseeya, sida tilmaamaha isu imaatinka, kala fogeynta, iyo xirasho af/san xirka.
- Natiijooyinka caddeynaya in cudur jiro ee baaritaanka antigen-ka ee degdega ah ayaa loo aqoonsanayaa mid horudhac ah in cudur jiro. Ilmaha laga helo in cudur jiro ee baarista antigen-ka ee degdega ah waa inuu raadsadaa baarista PCR ee xaqiijinta sida ugu dhakhsaha badan (sida ugu fiican 48 saacadood gudahood) goobta tijaabada (local testing site) ama farmashiyaha bixiya baarista oo ay isgo'doomiyaan ilaa laga helo natiijada tijaabada PCR ee xaqiijinaysa wax la hubo.

Khayraadka dheeraadka ah

Sidee ayaad qof ahaan isugu baari kartaa BTNX ee Jawaabta Degdeg ah ee COVID-19 Baarista Antigen=ka ee Degdegga ah ee Guriga Ingiriisi Faransiis (English French) (PDF)

Fiidiyowyo: Baarista antigen-ka degdega ah ee ardayda aan calaamada cudurka muujin (Rapid antigen testing for asymptomatic students) (waxaa lagu heli karaa luqado badan)